

# Foomka Diiwaangelinta

## Isticmaal foomkan haddii aad:

- haddaba leedahay myki oo aad dooneysid inaad diiwaangelisid; **AMA**
- aad dooneysid inaad iibsatiid oo aad diiwaangelisid myki cusub.

(Waxaa lagu diiwaangelin /iibsan karaa hal myki oo Keliya foomkii).

## Haddii aad dhega la'dahay, ama aad maqalka ama haddalka waxka qabto, nagala soo xiriir Adeega Ugudbinta Qaranka (National Relay Service:)

- taleefanka isticmaalayaasha TTY 133 677, ka dib weydiiso 13 6954 (13 myki).
- La hadal oo dhageyso taleefanka isticmaalayaasha 1300 555 727, ka dib weydiiso 13 6954 (13 myki).

## Haddii aad u baahan tahay turjumaan:

- Wac Adeega Turjumaada Afka iyo Qoraalka ( Translating and Interpreting Service) (TIS National) 131 450 weydiisana 13 6954 (13 myki).

## Way sahlan tahay inaad waxbadan ka barato myki

Gal **myki.com.au**

Wac **13 6954 (13 myki)**



# Macluumaadka Guud

## U soo dir foomkan

myki Mailbox

Reply Paid 4318

MELBOURNE VIC 8060

(Wax farangaboolo ah uma baahna)

## Ama ku xaree foomkan

- Xarunta soosaarista myki ee Southern Cross Station
- MetShop (Melbourne Town Hall, geeska Wadooyinka Swanston iyo Little Collins)

Gal [myki.com.au](http://myki.com.au) wixii ah faahfaahinta goobta.

## Ujrada Maamulka

Ujrada maamulka ee \$9.80 ayaa lagu dalacayaa qaar ka mid ah adeegyada kaadhka qaarkood oo ay ku jiraan codsiga in lagu bedelo myki ama wareejinta haraaga kuugu jira . Fadlan gal [myki.com.au](http://myki.com.au) wixii faahfaahin ah marka ujrada ah \$9.80 lagugu dalaco.

## Arimaha gaarka ah

Hay'ada Tigidhada Gaadiidka ( Transport Ticketing Authority ) (TTA) waxay fahamsan tahay oo ay xushmeynaysaa xaqa aad u leedahay arimahaaga gaarka ah waana naga go'an tahay ilaalinta arimaha gaarka ah. Sharciga Arimaha Gaarka ah ee Macluumaadka ee 2000 ( Information Privacy Act 2000 ) iyo Siyaasada Arimaha gaarka ah ee TTA ay sharciyeeya sidaan u ururineyno iyo u maamuleyno macluumaadkaaga shakhsiyeed.

Gal [myki.com.au](http://myki.com.au) ama wac 13 6954 (13 myki) wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan arimaha gaarka ah ama Qorshahayaga Arimaha gaarka ah.

## Faa'idooyinka diiwaangelinta myki -gaaga

- Waxa kuugu jira myki -gaaga waa la ilaalinayaa haddii aad uga soo warbixiso inuu kaa lumay ama lagaa xaday.

Fursada:

- si magacaaga loogu daabaco myki -gaaga si looga duwo mykiyada kale ee gurigiina laga leeyahay. ( Si aad u qaadata fursadan iskutalaab ku dhig sanduuqa ku haboon ee Qaybta D ( Section D))
- si aad ugu maamusho myki-gaaga xisaab internetka ah.
- buuxinta otomaatiga ah ee ku haboonaanta 'habee oo ilow.

## buuxinta otomaatiga ah ee myki

buuxinta otomaatiga ah ee myki waa hab fiican oo had iyo jeer lagu buuxinayo lacagta myki. Waa lacag bixinta otomaatiga ah myki -gaaga ee xisaab bangi ama credit card la xiriiira oo mar alaale markii ay lacagtu ka yaraato myki-gaaga. Buuxinta otomaatiga ah waxaad si sahal ah u habeynaysaa una ilaaweysaa.

Isla markaad hesho myki, qofka xisaabta leh ayaa habeyn kara buuxinta otomaatiga ah [myki.com.au](http://myki.com.au), ama adoo buuxinaya mykiFoomka Codsiga ee Buuxinta otomaatiga ah (Auto Top Up Request Form) ama adoo wacaya 13 6954 (13 myki).

**Waxaad ka heli kartaa kuwo badan oo ah Foomamka Diiwaangleinta myki (Registration Forms) adoo gelaya [myki.com.au](http://myki.com.au) ama wacaya 13 6954 (13 myki).**



# Macluumaadka Guud

## Qaybta A – Faahfaahinta Qofka Xisaabta leh

myki waxaa lagu diiwaangelin doonaa faahfaahinta qofka xisaabta leh. **Qofka xisaabta leh waa qofka maamuli doona myki isagaana ka masuul noqon doona.** Qofka xisaabta leh wuxuu sidoo kale noqon karaa qofka kaadhka leh (eeg Qaybta B (Section B)).

si kastaba ha ahaatee, waxaa jira wakhtiyo uu qofka xisaabta lehi uu u sameeyo xisaab qof kale oo noqon doona qofka xisaabta heya. Tusaale waalidka ama masuulka (qofka xisaabta haya) waxaa laga yaabaa inuu sameeyo xisaab ilmahooda (qofka kaadhka haya) xisaab hayuhu wuxuu heli karaac faahfaahinta diiwaangelinta ee qofka kaadhka haya iyo macluumaadka la xiriira isticmaalka myki.

## Qaybta B (Section B) – Faahfaahinta Qofka Kaadhka myki haya

**Qofka kaadhka heystaa waa qofka isticmaali doona Myki si uu ugu safro.** Myki layskuma wareejin karo waxaa isticmaali kara oo keliya qofka kaadhka heysta.

Magaca qofka kaadhka heystaa waxaa sidoo kale lagu daabici karaa myki. Tani waa ikhtiyaari waxaana la heli kara oo keliya markaad iibsaneysid myki cusub oo diiwaangashan.

**Qoraal muhiim ah oo loogu talagalay dadka sita kaadhka lacag dhimista** Waa inaad sidataa kaadhkaaga lacag dhimista wakhti kasta markaad safraysid maadaama ay tani tahay caddeynta lacag dhimistaada.

### • Carruurta 4-ta sanno ka yar

Carruurta 4 sanno ka yar waxay ku raacaan gaadiidka dadweynaha bilaash umana baahna myki.

### • Carruurta (4 - 16 sanno)

myki ilmaha waxaa loogu baahan yahay safar. Si kastaba ha ahaatee, caddeynta xaq u yeelashada ayaa looga baahan yahay carruurta jirta 4-16 sanno.

Haddii aad ugu baahan tahay Kaadhka Ardeyga (Student Pass) myki, waa inaad sidataa Kaadhka Lacag dhimista Ardeyga ee Gaadiidka Dadweynaha Victoria (Victorian Public Transport (VPT) Student Concession Card) wakhti kasta.

### • Ardeyda

Si aad u iibsato myki -ga ardeyga, fadlan **ha** isticmaalin foomkan. Gal myki.com.au wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan meeshii aad ka heli lahayd myki ardeyga.

Haddii aad jirto 17 sanno ama ka weyn, waa inaad sidataa Kaadhka Lacag dhimista Ardeyga (VPT Student Concession Card) caddeyn ahaan xaq u yeelashada lacag dhimista markaad ku safreysid myki -ga lacagta dhiman.

### • Dadka Fiktooriyaanka ah ee haysta Kaadhka Daryeelka Caafimaadka iyo kuwa heysta Kaadhka Lacag dhimista ee Hawlgabka

Markay ku safrayaan myki lacag dhiman leh fadlan sii wad inaad sidato Kaadhka Daryeelka Caafimaadka oo shaqeynaya (Health Care Card)\*^ ama Pensioner Concession Card^ (oo ay bixiyeen Centrelink ama Department of Veterans' Affairs).

Haddii aad xaq u leedahay inaad hesho warqadaha safarka ee bilaashka ah ma jirto wax isbedel ah ay leeyihiin sida warqadahan loo bixiyo ama loo isticmaalayo.

### • Dadka sita Victorian Seniors Card

Fadlan qaata Victorian Seniors Card kiina markaad ku safraysaan myki maadaama ay tani tahay caddeyntii xaq u yeelashadiina lacag dhimsita.

Commonwealth Seniors Health Card **looma** isticmaali karo nooc ka mid ah aqoonsiga lacag dhimista.

Haddii aad xaq u leedahay inaad hesho warqadaha safar bilaash ah ma jiro wax isbedel ah oo ku saabsan sida loo bixiyo ama loo isticmaalo warqadahan.

### • Dadka heysta Seniors Card ee qobolada kale

Dadka Da'da ah ee Kaadhka ka heysta dhammaan gobolada kale ee Australiya iyo territories waxay iibsaa karaan myki -ga lacagta dhiman. Fadlan sido Seniors Card markaad ku safreysid myki maadaama ay tani tahay caddeyntii xaq u yeelashadaada lacag dhimista.

## Qaybta C – Diiwaangeli myki jira

Haddii aad hadaba heysato myki oo aad dooneysid inaad diiwaangelisid, fadlan buuxi dhammaan qaybaha **Section D** mooyee.

Diiwaangelintu waa bilaash.

## Qaybta D – iibso myki Cusub oo Diiwaangashan

Haddii aad jeclaan lahayd inaad iibsato myki cusub oo diiwaangashan, fadlan buuxi dhammaan qaybaha **Section C** mooyee.

Fadlan dooro nooca myki adoo isku talaab ku dhigaya  **HAL** sanduuq oo kaliya.

Haddii aad iibsaneysid myki cusub oo diiwaangashan adoo isticmaalaya foomkan, waxaa jira lacag bilow ah oo ah myki kasta oo la bixiyo (\$10 ka lacagta dhan iyo \$7 ka lacagta dhiman).

Waxaad sidoo kale dooran kartaa inaad buuxiso kaadhkaaga cusub ee diiwaangashan ee myki adoo isticmaalaya kaadhkan. Si sahal ah u geli qiimaha doolarka inta u dhaxeysa \$1 ilaa \$50. faa'iidada iibsiga myki oo lagu buuxiyey lacagta myki waxaa weeye inaad ku safri karto kaadhkaaga isla marka uu kuu yimaadaba.

**Haddii aad soo direysid foomkan**, fadlan ku buuxi faahfaahinta credit cardkaaga Section E si aad lacag u bixiso. **Haddii aad xareynaysid foomkan**, waxaad bixin kartaa lacag caddaan ah, EFTPOS ama credit card.

\* Keliya Health Care Cards leh cinwaan Fiktooriya ah oo jira.

^ Fadlan ogow: lacag dhimista waxaa leh oo keliya qofka kaadhka sita uma gudbayso dadka ku tiirsan ee kaadhka ku qoran, xitaa markay la safrayaan qofka kaadhka sita.







## Section D – Purchase a New Registered myki (cont.)

### Credit Card Details (Only required if you are posting this form)

The myki card price and myki money top up amount (if applicable) will be debited from your credit card.


Credit card type  Visa  MasterCard

Name on credit card

Credit card number

Expiry date on credit card

Signature of **credit card holder**

 credit card holder please sign

Date

**PLEASE READ AND SIGN THE PRIVACY NOTICE AND DECLARATION IN THE NEXT SECTION.**

## Section E: Privacy Notice and Declaration

The account holder or cardholder ('you') will generally be able to access your personal information. If personal information sought by the Transport Ticketing Authority (TTA) ('we' or 'us') is not provided, we may not be able to provide the Card and related services, such as registration. For further information about privacy and on rights of access to personal information, visit [myki.com.au](http://myki.com.au) or call 13 6954 (13 myki).

Personal information provided by or about you or generated by using the Card is collected by Public Transport Authorities# to issue and administer the card and relevant entitlements.

Personal information held by Public Transport Authorities# may be used or disclosed (including to each other) for the operation of myki; to verify entitlement to concession travel; for ticketing enforcement; in emergencies; otherwise as required or authorised by or under law; or with your consent. We may send you information about transport-related services. We may contact you about other goods and services which we consider may be of interest, unless you have opted out by crossing the box below or subsequently through the contact details provided.

A cardholder's personal information may be disclosed to an account holder.


# Public Transport Authorities means TTA, the Department of Transport and any agent, contractor or delegate of TTA or the Department of Transport including Metlink and public transport operators.

I **DO NOT** wish TTA to contact me about other goods and services which it considers may be of interest.

**THIS DECLARATION MUST BE SIGNED BY BOTH THE CARDHOLDER AND ACCOUNT HOLDER.**


**I agree to the Terms and Conditions on this form and have read the Privacy Notice.**

Signature of **account holder** or legal guardian/agent for applicants unable to sign

 account holder please sign

Date

Signature of **cardholder** (if different to account holder) or legal guardian/agent for applicants unable to sign

 cardholder please sign

Date

Legal guardian/agent name (if applicable)

Relationship to applicant (if applicable)

Legal guardian/agent telephone number (with area code)

